# MACLUUMAAD KU AADDAN SII WADIDDA MACLUUMAAD U GUDBINTA DIIWAANKA KANSARKA CARRUURTA EE ISWIIDHISHKA

Macluumaadkan wuxuu ku socdaa adigaaga laga daweeyay/laga daweynayo cudur ka diiwaan gashan Diiwaanka Kansarka Carruurta ee Iswiidhishka. Si la xiriirta xanuunsashadaada ayaa taas waaliddiintaada loogu wargeliyay. Iminka marka aad qaangaar noqotay waxaan rabnaa in aan ku siinno macluumaad la cusbooneysiiyay oo ku aaddan wixi warbixin ah ee diiwaanka loo gudbiyay.

**Haddii Aad oggoshihid in macluumaadka ku jira Diiwaanka Kansarka Carruurta ee Iswiidhishku uu ku sii jiro uma baahnid in aad haba yaraate wax tallaab ah qaaddid.**

*Haddii Aad rabtid in aad wax dheeraad ah ka ogaatid Diiwaanka Kansarka Carruurta ee Iswiidhishka, fadlan akhriso macluumaadka aan halkan hoose ku ururinnay.*

## GAADASHA DAMBE

Marka laga reebo daryeelka caafimaadka iyo wax baridda, lixda xarumood ee kansarka carruurta ee Iswiidhan ka jira, waxay wadaan shaqo horuumarineed- iyo cilmi baaris ballaaran. Iyadoo qeyb ka ah shaqadan, macluumaadka cudurkaaga iyo dib u hubinta daweynta waxaa lagu diiwaan geliyay Diiwaanka Kansarka Carruurta ee Iswiidhishka.

Si waqtiga dheer loogu qiimeyn karo daweynta waxaan aad ugu baahannahay in aan la socoshada sii wadan karno annagoo adeegsaneyna diiwaankaas. Sidaasna waxaa loo sameynayaa si loo diiwaangeliyo sii darsashada mararka qaarkood ka imaan karta cudurka iyo dawada qofka la siiyay.

Waxaan sidaas darteed rejeyneynaa in aan xitaa mustaqbalka macluumaad ka soo qaadan karno feylalka macluumaadka caafimaadka ee xarumaha caafimaadka ee laga yaabo in ay la socoshadaada la wareegi doonaan.

Si aan wax dheeraad ah uga baranno sii darsashada gaadaal dambe ka timaada waxaan xitaa rabnaa in aan fursad u helno in aan barbar dhigno macluumaadka diiwaannada kale sida tusaale ahaan diiwaanka bukaannada. Haddii aan aragno wax, caafimaadkaaga muhiim u noqon kara, mar kale ayaan kula soo xiriiri karnaa.

Natiijada baaritaanka ee diiwaanka laga ururiyay kuma jiraan macluumaad keenaya in qof goonidiisa ah la aqoonsan karayo. Macluumaadka waxaa mar walba loo maareynayaa si qarsoodi ah oo loo sharciyeeyay si waafaqsan xeerka ilaalinta macluumaadka.

**Haddii Aad rabtid in aad la xiriirtid Diiwaanka Kansarka Carruurta ee Iswiidhishka, fadlan qeybtan yar u soo dir cinwaanka aad ka heleysid bogga la soo dhaafay.**

**Waxaan rabaa (istallaab saar mid ama dhawr ka mid ah waxyaabaha soo socda haddii saas la rabo):**

☐ qoraal laga soo saaray Diiwaanka Kansarka Carruurta

☐ in macluumaadkeyga ku jira Diiwaanka Kansarka Carruurta ee Iswiidhishka la aqoonsi tiro

☐ In macluumaadkeyga Diiwaanka Kansarka Carruurta ee Iswiidhishka la tirtiro

☐ Macluumaad dheeraad ah oo ku aaddan Diiwaanka Kansarka Carruurta ee Iswiidhishka

Macluumaadkeyga xiriirka:

Magac:

Cinwaan:

Nambar taleefan:

________________________________________________

Taariikh / Magac / Saxiix